**Sharci lamba. 14 ee 15 Febarayo 1967**

**Sharci la xiriira xakameeynta beeca badeecadda daruuriga ah**

Kadib markii uu helay oggolanshada Golaha Qaranka;

## WAXAA LA SOO SAARAY

Sharciga halkaan ku qoran:

### Qod. 1

1. Waxaa la dhisay Guddiga La-talitanta xakameeynta beeca badeecada daruuriga ah iyadoo ka kooban:
    1. — Agaasimaha Guud ee Wasaradda Warshadaha iyo Ganacsiga Guddomiye;
    2. — Agaasimaha Waaxda Ganacsiga Ku-Xig guddomiye;
    3. Maxada Qaybta Ganacsiga Gudaha ee Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga Xubin;
    4. — Wakiil Wasaaradda Beeraha & Xanaanada Xoolaha Xuibin;
    5. — Wakiil Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Gaadiidka Xubin;
    6. — Wakiil  Wasaaradda Caafimaadka iyo Shaqada Xubin;
    7. — Wakiil Wasaaradda Maaliyada Xubin;
    8. — Wakiil Dowladda Hoose Xubin;
    9. — Wakiil Rughta Ganacsiga Xubin.
2. Guddiga la-talinta waxaay u xilsaaran tahay in ay u soo jeediso Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga habkii loo xakameyn laha keenista iyo qeybinta iyo gaadiiska badeecada daruuriga, beec geynta iyo qiimaha tafariiqda  badeecada  iyo wax allaliyo wixii la xiriira arrimahaas iyo Wasaaradda.

### Qod. 2

1. Guddigu wuxuu yeelanaya shirarkooda caadiga labadii biloodba mar;
2. Iyadoo la tixgelinaayo baahidda deg-deg ah ee loo qabo in la xadido qiimaha badeecada daruuriga ah, Madaxweynaha wuxuu isugu yeeri kara shir muddo kasto oo loo baahdo;
3. Si ay sharci u noqoto shirarka Guddiga waxaa loo baahan yahay in xubnaha ugu tirada badan ay soo xaadiraan;
4. Haddi si siman loo codeeyo waxaa cod Guddomiyuhu kala bixin doona.

### Qod. 3

Wuxuu sharcigaan ku tilmaamaya "badeecada daruuriga ah" badeecadda ku qoran shaxda sharcigan ku lifaqaan iyo qodobka kale ee Wasiirka Warshadda iyo Ganacsiga, kadib markii la dhegeystay Guddiga La-Talinta oo ku xusan Qodobka 1 oo ku tilmaami kara xeer.

### Qod. 4

1. Haddii ay la noqoto  si uu hubiyo helista badeecada ama tira ka badan , ama la suggo in badeeca daruuriga ah si siman loo qeybsadao ama lagu iibsado qiima macquul ah, wuxuu Wasiirka Warshadaha & Ganacsiga soo saari karaa xeer la qoondenaya helista, qeybinta, beeca iyo ka ganacsigabadeecada;
2. Waxaa intaas dheer oo Wasiirku awood u leeyhay arrimahaa hoos ku qoran:

a. Kormeerka beeca iibista iyo gadiida ee badeecadda daruuri ah;
b. Xadeynta iyadoo shari la bixin doono ama fassax keenista, qeybinta, iibista, isticmaalka badeecadda daruuri ah;
c. Waxaa reeban in la iibiyo badeecadda daruuriga oo loogu tala galay in iibiyo;
d. In qiimo habbon lagu iibiyo badeecadda soo harta;
e. Joojinta iyo nidaaminta nooc kasto oo ganacsi ama maalgelin ah ee la xiiira bedeecadda daruuriga ah haddii Wasiirka Warshadda iyoGanacsiga u garto in ay wax faa'ido u leheen danta guud;
f. In la aruuriyo macluumaadka iyo warbixinadaha si loo xagameeyo ama loo diido howlaha sare ku xusan;
g. In ciddii ku howlan qeybinta am aka ganacsiga badeecooyinka daruuriga ah, tiarada ay haystaan, diiwanada lagu qoro, xisabaadka iyo qorallada la xiriira ka ganacsiga iyo wax allaliyo wixii macluumadka oo la xiriira.

**Qod. 5**

Waxaa laga qaadan rafcaan Maxkamada Sare amarradda ku qoran xeerarka ee Wasiirka Warshadda iyo Ganacsiga eek u saabsan xadideynta qiimaha badeecooyinka daruuriga.

**Qod. 6**

1. Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga wuxuu Xeer ku magacaabi doono Guddiyada Gobolled ee Xadideynta qiimaha. Gobol kasto Guddomiya Gobolka ayaa noqon doono Guddomiyaha Xadiideynta qiima kuwaa oo ka kooban:
   a) Wakiiladaha Wasaarada Dhaqaalaha;
   b) Wakiiladaha Wasaarada Caafimadka iyo Shaqada;
   c) Wakiiladaha Dowladda Hoose ee caasimada Gobolka.
2. Wasiirka Warshadaha & Ganacsiga wuxuu xeer ku carifi doona awoodaha Guddiyada sida ku cad faqradda sare iyo qaab samaynta la xiriira howlahaasi.

**Qod. 7**

1.
   a) Ciddii u hoggansami weydo dekreetada lagu soo qoray iyadoo la dhowraayo qod. 4 (2) – (b) iyo (e) wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 3 sano iyo ganaax ilaa Sh.So. 500 ama labada ciqaab oo isku jira;
   b) Ciddii ka hortimada xeer lagu saaray iyadoo la dhowraayo qod 4 (2) iyo (e) wuxuu muteysan doonaa xarig ilaiyo 6 bilood oo xarig ah ama ganax ilaa Sh. So. 1.000 ama laba ciqaab oo la isku daro;
   c) Ciddii ka hortimada xeer lagu soo saaray iyadoo la dhowraayo qod. 4 (2) (d) waxaa uu muteysan doona xarig ilaa 3 bilood ama ganax ilaa Sh.So. 500 ama labada ciqaab oo la isku daro;
   d) Ciddii ka hortimaado xeer lagu soo saaray iyado la dhowraayo qod. 4 (2) (g) wuxuu muteysan doona xarig ilaa 6 bilood wuxuu muteysan doona xarig ilaa 6 bilood ama ganaax ilaa Sh.So. 1.000 ama labada oo la isku daro;
2. Ciddii u hoggansami waayo sharcigaan ama xeerarka lagu soo saara islasharciga wuxuu muteysan doono haddii aysan jirin ciqaab loo xadiday ganaax la eg Sh.So. 500.

**Qod. 8**

Wasiirka Warshaddaha iyo Ganacsiga, kadib markii la dhegeystay Guddiga La-talinta wuxuu soo saari kara xeerar si loo fuliyo sharcigaan.

**Qod. 9**

Waxaa la buriyey sharci iyo amar kasto oo khilaafsan ama ka soo horjeeda sharcigaan.

**Qod. 10**

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuriyadda waxaana lagu keydin doonaa Keydka Rasmiga ee Shuurucda iyo Dekreeyooinka ee Jamhuuriyadda.

Waxaa la faraya in loo hoggansanado sharcigaan cid kastana loo hoggamiyo.

Muqdisho, 15 Febarayo 1967.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha
**Abdirizak Haji Hussein**

Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga
**Abdullahi IssaMohamud**